

KULEYL

AMA

CUNTO



Ma ahan inaad dooratid.

Dad badan ayay tahay inay doortaan biilkooda tamarta iyo waxyaabaha kale ee muhiimka ah – cuntada, daawada, iyo daryeelka caafimaadka. Barnaamijka Kaalmadda Tamarta ee Minnesota wuxuu qoysaska ka caawiyaa siday ku bixin lahaayeen biilkooda tamarta si aysan u kala dooran baahiyaha nolashooda. U gudbi warkan saaxiibadaa iyo qoyskaaga.

Barnaamijka Kaalmadda Tamarta:

- Waxay u adeegeysaa labadaba kireystayaasha iyo milkiilayaasha guriga
- Waxay u dhaxeysaa laga bilaabo \$300 illaa \$1,600 waxay ku xiran tahay weynaanta qoyka, daqliga iyo, qiimaha tamarta, deeq isku celcelin u dhaxeysa oo illaa \$550
- Qiyaasta faa'iidada waxay ku saleysan tahay qarashaadka kulaylinta guriga, tirada qoyska, iyo dakhliga soogala
- Waxay bixiyaan kaalmadda la xariirta joojinta tamarta, shidaalka/shidaalka yaryar ee taangiga, iyo dayactirka foornada guryaha
- U qalmidda waxay ku saleysan tahay daliga 3 bilood ee la soo dhaafay iyo waxyaabaha kale oo uu leeyahay lama xisaabinaayo.

Tusaalayaasha Uqalmida:

Tirada qoyska	3 bilood ee lasoo dhaafay dakhliga ugu badan oo soogalay
1	\$8,479
2	\$11,088
3	\$13,697
4	\$16,307

Codsi Kaalmadda Tamarta
mn.gov/commerce/eap.jsp
ama wac 1-800-657-3710